# Furitaanka iyo Rabshadda Qoyska

Rabshadda qoyska waxay dhacdaan marka qof uu ku xad gudbo qof qoyskooda ah. Waxay ku dhici kartaa qof kasta - labbada carruur ah iyo dadka waa wayn.

Rabshada qoyska waxay noqon kartaa erayo, falal ama xataa inaan qof la siin daryeelka ay u baahan yihiin. Waxay noqon kartaa shil keliya, ama nooc soo noqnoqda oo dhaqanka ah.

Rabshada qoyska waxay dhici kartaa ka hor, muddada ama ka dib lamaane kala maqnaada. Dadka waxay khatar wayn inta badan ugu jiraan rabshada qoyska degdeg ka dib kala maqnaanshaha.

Haddii aad garanayso qof inuu khatar degdeg ah ugu jiro, wac 9-1-1 ama laantaa booliska kuu dhow.

Isbeddelada *Xeerka Furitaanka* waxay dhaqan geli doonaan Juulay 1, 2020. Qaar ka mid ah kuwan isbeddelada loogu talo galay garsoorayaasha iyo kuwa kale waxay sameeyaan qaban qaabooyin badbaado ah oo haboon marka ay jirtay rabshadda qoysku.

## Boggana


- Rabshada qoyska sida waafaqsan Xeerka Furitaanka
- Tusaalaha rabshada qoyska
- Khasab iyo rabshada xakamaynta rabshada qoyska
- Rabshada qoyska iyo qaban qaabooyinka daryeelka waalidka ee carruurta
- Qoysaska ku lugta leh qaybaha nidaamka cadaalada isku wakhti
- U helida caawimo rabshada qoyska


## Rabshada qoyska sida waafaqsan *Xeerka Qoyska*

Rabshada qoyska waxay qaadan kartaa qaabab badan oo waxay waxyeeli kartaa haddii

- ay si toos ah ula kulmaan iyadda lafahoodu
- arag ama maqal iyadda
- garo inay dhacayso

Sida waafaqsan *Xeerka Furitaanka,* rabshada qoyska waa dhaqan kasta oo ah

- rabshad, ama
- hanjabaad, ama
- nooca khasabka ah iyo dhaqanka xakamayn, ama

- dhaqanka sababa xubinta qoyska inay u baqdaan badbaadadooda ama badbaada qof kale

Marka noocyo badan oo xad gudub ah ay yihiin falal dembiyeed, dhaqamada aan falka dembiga ah lahayn weli waxaa looga fekeraa rabshada qoyska sida waafaqsan *Xeerka Furitaanka*

Carruurtu waxay ula kulmaan rabshada qoyska qaabab kala duwan, sida

- dagaalanka ama caydka ku wajahan dhankooda
- araga ama maqalka qof la dagaalamaya xubin qoyska ah
- arag xubin qoyska ah oo baqanaya ama dhaawaca ah

Dhammaan tan waxaa looga fekeraa xad gudubka qoyska iyo ku xad gudubka ilmaha sida waafaqsan *Xeerka Furiitaanka* cusub.

## Tusaalaha rabshada qoyska

Halkan waxaan dhowr tusaale oo rabshada qoyska sida waafaqsan *Xeerka Qoyska*

| Xad gudubka jidhka ah |
|---|
| Feedhida, dhirbaaxida, laadista, dhufashada, jiidista, cabudhinta, jiidista timaha, qaniinista, dooxida, ku qufulida qof meel cidhiidhi ah, hanynta ama qof xadhig ku xidhida<br><br>*Marka dadku ay jilaan inay nafahooda iska ilaaliyaan ama qof kale, falalkooda loogama fekero rabshada qoyska. |
| Xad gudubka galmada |
| U taabashada qaab galmo oggolaansho la’aan, ku khasbida qof inuu sameeyo galmo ama inuu sameeyo falal galmo, qof daawadsiinta sawirada qaawanida ah, utaabashada ilmaha qaab galmo, ku dhiirigelinta ilmahu inay nafahooda u taabtaan qaab galmo. |
| Hanjabaada in la dilo ama la dhaawaco qof |
| Ku hanjabida ama dhirbaaxida ama feedhi qof, ugu hanjabida qof toogasho |
| Dhibaataynta ama dabagalka |
| Wicida, iimayl u dirida ama qoraal u dirida marar badan, daba galida ama eegida guriga qof ama goobta shaqada, kagala socoshada qof abka, |

| |
|---|
| sooftiweerka ama kamarada fiidyaha, raad raacida hawalaha qof ama saxaafada bulshadda |
| Ku guul daraysashada bixinta waxyaabaha lama huraanka nolosha u ah |
| Aan siinayn cunto carruurta, aan u oggolayn qof inuu helo daryeelka caafimaadka ay u baahan yihiin, qaadashada qof kursi curyaankiisa |
| Xad gudubka cilmi nafsiyeed |
| Had iyo jeer ku qaylinta, cambaaraynta ama caayida qof, maamulida qof wakhtigiisa, falalka, dharka, qaabka timaha, aan u oggolaan qof inuu arko saaxibada ama qoyska, aan u oggolaan qof inuu ku dhaqmo diintooda ama dhaqanka, wadaagida sawiro kalgacal leh ama qof iyaddoon oggolaansho laga haysan ama u hanjabida in sidaas la sameeyo qof la xidhiidhka masuuliyiinta laanta socdaalka si wadanka looga saaro |
| Xad gudubka dhaqaalaha |
| Ku khasbida qof inuu shaqeeyo ama aan loo oggolaan inay shaqeeyaan,xanibida qof inuu isticmaalo kootadooda bangiga, ka xanibida lacag qof ama maamulida sida ay u kharash gareeyaan, ku qaamaynta qof magaca qof kale iyaddoonu ogayn |
| Hanjabaada in la dilo ama la dhaacawo xawayaan ama waxyeelo loo gaysto hantida |
| Ku hanjabida in la waxyeeleeyo xawayaanka rabaayada qoyska, u hanjabida in la gubo guriga qoyska |
| Dhab ahaan dilida ama waxyeelaynta xawayaan ama waxyeelaynta hantida |

## Khasab iyo rabshada xakamaynta rabshada qoyska

Khasab iyo rabshada xakamaynta rabshada qoyska waa nooca dhaqanka xad gudubka dadku isticmaalaan si ay u xakameeyaan ama u maamulaan qof kale oo qoyska ah. Xubinta qoyska wax maamulaysaa waxa uu isticmaali karaa isku darka dareenka, qaab cilmi nafsiyeed, galmo, dhaqaale ama qaababka kale ee xad gudubka, sida doorashada dharka lamaanaha, xakamaynta lacagtooda, ama inaanay u oggolaan iyagu inay shaqeeyaan ama arkaan saaxiibo. Xad gudubka sidoo kale inta badan waxa uu ku xidhan yahay rabshadda gacan qaadis ah.

Khasab iyo rabshada xakamaynta rabshada qoyska aad ayay u khatar badan tahay. Dadka ku dhaca nooca xad gudubka ah inta badan waxay sii wadaan ama kasii daraan rabshadda qoyska ka dib kala maqnaanshaha ama furitaanka.

## Rabshada qoyska iyo qaban qaabooyinka daryeelka waalidka ee carruurta

Carruur ku nool dhexda rabshada qoyska waxay khatar ugu jiraan labbadaba waxyeelo xiliga dhow iyo xiliga dheer.

Xataa marka rabshada qoyska aanay ku wajahnayn iyada, waxyeelo ayay ku tahay carruuru inay ku arkaan dhexda xubnaha qoyska ee kale ama inay ogadaan in xubinta qoyska lagu xad gudbay.

Carruurta la kulma rabshada qoyska waxay dhib ka soo gaadhi kartaa waxyeelada jidhka ama nafsiyeed. Rabshada qoyska waxay beddeli kartaa koriinka maskaxda, suuragal ahaan keentaa dhinta koriinka dareenka, garaadka, dhaqanka iyo dhibaatooyinka bulshadda gaadhi karta wakhti dheer.

Gudaha qoyska, dhammaan go’aamada ku saabsan carruurta waxay ku salaysan yihiin waxay tahay danka ilmaha ugu fiican. *Xeerka Furiinka* cusub waxay leedahay tiro asbaabo ah oo garsoorayaashu ay ka fekerayaan marka go’aan lagaga gaadhayo waxay tahay danta ugu fiican ilmaha, iyo sababta ugu muhiimsan ee had iyo jeer badbaadada jidhka ilmaha, dareenka iyo nafsiyeed, amniga iyo fayo qabka.

## Asbaabaha gaarka ah ee ay garsoorayaashu ku xisaabtamaan

Garsoorayaashu waa inay ka fekeraan saamaynta rabshadda qoysku ku leedahay daryeelka waalidka u habbaynteeda carruurta marka waalidku ay is furaan. Tan waxaa ka mid ah kartida iyo u diyaar ahaanshaha qofka galay dembiga rabshada ah si loo daryeelo ilmaha oo loola shaqeeyo waalidka kale.

*Xeerka Furitaanka* cusub waxa uu qoraa asbaababa garsoorahu uu u baahan yahay si uu u eego marka laga fekerayo saamaynta rabshada qoyska, sida

- sifada, khatar ahaanshaha iyo inta jeer ee xad gudubka
- khatarta waxyeelada ilmaha
- haddii qofku ku lugta leh rabshada inay qaaday tallaabooyin kasta si looga hortaggo rabshad dheeraad ah oo loo horumariyo daryeelkoda waalidka, sida dhammaystirka kooraska daryeelka waalidka ee dadka ku xad gudbay carruurtooda ama lamaanaha

Garsooraha sidoo kale waa inay ka fekeraan arrima kasta oo maxkamadda ah ee la xidhiidha badbaadada, amniga iyo fayo qabka ilmaha. Tan waxaa ku jiri kara:

- xabsiyada lagu xukmayn sababta weerarka ilma yar ah
- amarada ilaalinta ilmaha la xidhiidha ilmaha
- xabsiyada lagu xukmayn sababta dembiga ku lidka ah xubin qoys kale ah

## Caddaynta rabshada qoyska

SI uu garsooraha ugu xisaabtamo rabshada qoyska, waa inay jirtaa caddayn ku saabsan waxa dhacay. Caddayn keenida way adkaan kartaa sababtoo ah rabshada qoyska inta badan waxay u dhacdaa si gaar ah. Halkan waxaa ah dhowr tusaalooyinka caddaynta ah:

- wicitaanada 9-1-1
- warbixinta qoran ama caddaynta gudaha maxkamadda ee ka timid dadka la kulmay, arkay ama maqlay rabshada, ama kuwa arkay saamaynta xad gudubka
- sawirada dhaawacyada
- diiwaanada shilalka xad gudubka
- cusbitaalka ama diiwaanada caafimaadka

## Qoysaska ku lugta leh qaybaha nidaamka cadaalada kala duwan

Qoysaska wakhtiyada qaarkood waxay ku lug lahaadaan maxkamadda isku wakhti. Tani inta badan waa run xaaladaha rabshada qoyska, marka nidaamka cadaalada falka dembiyeed, nidaamka ilaalinta ilmaha, iyo nidaamka cadaalada qoysku ay ku lug lahaan karaan.

Xaaladahan waxay noqon karaan kuwa dhib badan. Tusaale ahaan, haddii maxkamadda qoysku aanay garanayn wax ku saabsan amarka falka dembiyeed ee sheegaya inaanay jiri karin wax xidhiidh ah oo u dhexeeya waalidka, garsooraha waxa uu samayn karaa amarka daryeelka waalidka is khilaafsan. Tani waxay adkayn kartaa ama ka dhigtaa mid aan suuragal ahayn in la raaco labbada amar oo waxay abuuri kartaa khataraha badbaadada.

Si tan wax looga qabto, *Xeerka Furiinka* cusub waa uu sheegaa in garsoorahu uu ku xisaabtamo haddii ay jiraan wax kuwa hadda ah ama ilaalinta madaniga ah ee aan weli la oggolaan, ilaalinta ilmaha, ama dacwada falka demiyeed ama amarada kale ee la xidhiidha furitaanka lamaanaha.

Haddii lagu furay ama lagu furayo oo aad dalbanayso amarka maxkamdda daryeelka walid, masruufka carruurta ama taageerada kafiilka, waxaad u baahan doontaa inaad maxkamadda u sheegto wax ku saabsan dawacdo kasto oo falka dembi ama ilaalinta carruurta ama amarada kugu lug yeelaysiiya adiga ama xaaskaagii hore, ama wax ku saabsan xayiraada ama amarada ilaalinta ah ee ku lid ah mid idinka mid ah.

## U helida caawimo rabshada qoyska

**Haddii aad garanayso qof inuu khatar degdeg ah ugu jiro, wac 9-1-1 ama laantaa booliska kuu dhow.**

Dad badan iyo ururo badan ayaa ku caawin kara haddii aad la taaacalayso rabshada qoyska. Tusaale ahaan, waxaad la hadli kartaa qareen, dhakhtar, shaqaalaha bulshadda, ama la taliye. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa caawimo adeegyada dhibanaha, ururada bulshadda, kooxaha taageerada, booliska, laymanka caawimada, hoyga ama guryaha kala guurka ee kuu dhow.

Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan rabshadda qoyska iyo helida caawimada, fadlan ka eeg ilahan websaydka Waaxda Caddaalada Kanada:

- Rabshada Qoyska
- Ka hel caawimo rabshada qoyska
- Xad gudubku waa Khalad
- Xad gudubku waa Khalad Luqad kasta
- Xad gudubku waa Khalad Dhaqan Kasta Inuit
- Xda gudubku waa ku Khalad Dhaqan Kasta Qoomamka Koowaad iyo dadka Métis
- Ku xad gudubka Ilmahu waa khald: Maxaan Qaban Karaa?
- Hel adeegyada dhibaha adiga kuu dhow